DOWLADDA HOOSE EE DEGMADA JARIIBAN
PUNTLAND, SOOMAALIYA

OGEYSIIS TARTAN QANDARAAS OO FURAN

Casuumaad loo fidinayo shirkadaha danaynaya inay soo gudbiyaan dalabyo qandaraas

Tixraaca Degmada: JLG/PROC/2026/015	Taariikhda: 19 Nofeembar 2026
Tixraaca PNTB: PNTB/52/2026	Xilliga kama dambaysta ah: 03 Diseembar 2026, 4:00 galabnimo

UJEEDDO: Qandaraaska rakibidda, tijaabinta iyo hawlgelinta nidaamyada tamarta cadceedda ee afar ceel-biyood oo ku yaalla Degmada Jariiban.

Dowladda Hoose ee Degmada Jariiban waxay ku martiqaadaysaa shirkadaha qandaraaslayaasha ah ee leh aqoonta farsamo, khibradda iyo awoodda lagama maarmaanka ah inay ka soo qaybgalaan tartankan furan.

Qandaraasku wuxuu qayb ka yahay mashaariicda horumarineed ee lagu fulinayo kabka miisaaniyadeed ee Mashruuca LoCAL (Local Climate Adaptive Living Facility), kaas oo ay taageerto Sanduuqa Horumarinta Raasamaalka ee Qaramada Midoobay (UNCDF).

1. Shaqada qandaraaska iyo goobaha fulinta

Nooca shaqada	Goobaha fulinta
Sahayda, rakibidda, tijaabinta iyo hawlgelinta nidaamyada tamarta cadceedda ee afar ceel-biyood. Matoorrada naaftada ee ceelashaas waxaa loo sii haynayaa kayd ahaan.	Doorshaanle, Bararweyne, Laan Fardood iyo Birxoog — Degmada Jariiban.

2. Helitaanka dukumentiyada qandaraaska

Dukumentiyada qandaraaska waxaa laga heli karaa lifaaqyada la socda ogeysiiskan muddada u dhexaysa 19 Nofeembar 2026 iyo 03 Diseembar 2026. Shirkadaha danaynaya waa inay si taxaddar leh u akhriyaan tilmaamaha, shuruudaha farsamo iyo shuruudaha maaliyadeed ka hor intaysan soo gudbin dalabkooda.

3. Shuruudaha iyo Dukumiintiyada laga doonayo shirkadaha

Shirkad kasta oo tartamaysa waa inay soo gudbisaa dukumentiyada soo socda:

Lr.	Shuruudda	Faahfaahinta
1	Diiwaangelin iyo cashuur-bixin	Shahaadooyin iyo shatiyo sax ah oo ka socda Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka, Wasaaradda Ganacsiga iyo Guddiga Qandaraasyada Puntland (PNTB), iyo caddaynta cashuur-bixinta ee Wasaaradda Maaliyadda Puntland.
2	Khibrad hore	Liiska iyo caddaymaha mashaariic la mid ah oo si guul leh loo fuliyey saddexdii sano ee ugu dambaysay, gaar ahaan mashaariicda dawladda.
3	Injineerka mashruuca	Taariikh-nololeedka (CV) iyo shahaadooyinka waxbarasho iyo xirfadeed ee injineerka mas'uulka ka noqonaya fulinta mashruuca.
4	Xogta shirkadda	Warbixinta guud ee shirkadda (Company Profile), oo muujinaysa taariikhdeeda, khibraddeeda, awooddeeda farsamo, shaqaalaha iyo agabka ay haysato.
5	Dalabka maaliyadeed	Liiska qiimaynta shaqooyinka iyo agabka (BOQ) oo si dhammaystiran loo buuxiyey, wadarta qiimahana lagu qoray tirooyin iyo xarfo.
6	Saxeex iyo shaabad	Dhammaan foomamka dalabka iyo BOQ-ga waa inay wataan saxeexa iyo shaabadda rasmiga ah ee shirkadda.

Fiiro gaar ah: Dukumentiyada la codsaday waa inay noqdaan kuwo dhammaystiran, sax ah, isla markaana waafaqsan shuruudaha qandaraaska.

4. Habka loo soo gudbinayo dalabyada

Shirkaduhu waxay dalabyadooda oo si rasmi ah, lasoo saxiixay, lana shaabadeeyey ku soo gudbin karaan mid ka mid ah cinwaannadan hoose, iyagoo raacaya tilmaamaha ku qoran dukumentiyada qandaraaska:

Xafiiska Degmada	Xafiiska Dowladda Hoose ee Degmada Jariiban, Puntland Ama
Email ka	procurementjariibandistrict@gmail.com

WAQTIGA KAMA DAMBAYSTA AH: Khamiis, 03 Diseembar 2026, saacadda 4:00 galabnimo (EAT/UTC+3).

Dalabyada la soo gudbiyo xilliga kama dambaysta ah kaddib lama aqbali doono, si waafaqsan shuruudaha dukumentiyada qandaraaska.

5. Furitaanka iyo qiimaynta dalabyada

Dalabyada waxaa si rasmi ah loogu furi doonaa Xafiiska Dowladda Hoose ee Degmada Jariiban maalinta Khamiista, 03 Diseembar 2026, isla marka uu xirmo waqtiga gudbinta dalabyadu ee 4:00 galabnimo (EAT/UTC+3).

Furitaanka iyo qiimaynta dalabyada waxaa loo fulin doonaa si furan oo hufan, iyadoo ay ka qaybqaadanayaan guddiyada qandaraasyada ee heer Degmo iyo heer Puntland, sida ku cad habraacyada khuseeya. Natiijada tartanka waxaa loo shaacin doonaa hab waafaqsan nidaamka qandaraasyada.

6. Xog dheeraad ah iyo xiriir

Wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan qandaraaskan, shirkadaha danaynayaa waxay kala xiriiri karaan Dowladda Hoose ee Degmada Jariiban iimaylkan: procurementjariibandistrict@gmail.com.

Dowladda Hoose ee Degmada Jariiban waxay dhiirrigelinaysaa tartan furan, daahfurnaan, isla-xisaabtan iyo fursad loo siman yahay oo ay helaan dhammaan shirkadaha buuxiya shuruudaha qandaraaskan.

DOWLADDA HOOSE EE DEGMADA JARIIBAN
Puntland, Soomaaliya